

Si aad ugu sii socoto dib-u-eegista codsigaaga Xubinnimada Tababaraha oo ansixinta, waa inaad tilmaamntaa inaad fahamsantahay oo aad ogolaatay inaad raacdid xeerarka iyo shuruudaha xiggo.

Waan fahamsannahay gudbinteyda codsiga **Xubinnimada Tababaraha** ee Develop waxay quseysaa dib u eegis buuxda ee [Achieve – Xarunta MN ee Horumarinta Xirfadlaha](#) oo waa inay buuxisaa **dhammaan** shuruudaha ansixinta iyo cusbooneysiinta sida lagu tilmaamay **Wadooyinka Minnesota iyo Shuruudaha ee hagida Ansixinta Tababaraha**.

Waxaan dib u eegay oo aan raacayaa tilmaamaha iyo shuruudaha lagu tilmaamay [Hagida Ansixinta Koorsada iyo Gudbinta Dhacdada oo](#) loogu talloagalay ansixinta Koorsada iyo ansixinta Dhacdada.

Aniga ayaa mas'uul ka ah gudbinta **Xubinnimadeyda Shaqsiga iyo codsiga (codsiyada) Xubinnimada Tababaraha** oo onleenka ee Develop oo waan ogolahay inaan gudbiyo dhammaan dokumintiyada looga baahanyahay ansixinta ee Achieve - [Xarunta MN ee Hormarinta Xirfadlaha](#) oo waqti qaabeysan.

- Waan fahamsannahay inay qaadan karto ilaa **lix toddobaad** oo codsigayga (codsiyada) ee dib loogu eegayo ansixinta Achieve.

DABEECADA ANSHAXA

Marka la ansixinayo **Xubinnimadeyda Tababaraha**, Waxaan kula dhaqmayaa nafsadeyda iyo **Dhacdooyinka Tababarka** ee qaab xirfadeysan oo ogolaaday inaan:

- U hogaansanaado heerarka lagu tilmaamay [Xeerka Anshaxa NAEYC: oo Dheeraad ku ah Macalimiinta Dadka Weyn ee Carruurnimada Hore](#)
- Isticmaalo [Qaabdhismeedka Kartida Tababaraha](#) iyo Aalada Qiimeynta Tababarka iyo **Tababaraha Develop (TTET)** si loo qiimeeyo oo sare loogu qaado xirfadaheyga waqti kadib.
- **Siiyo goobta dadweynaha iyo siiyo boos badqab ah ka qeybgalayaasheyda:**
 - Kuma **sameynayo** Dhacdooyinka **Tababarka** ee gurigeeyga.
 - Kuma **sameynayo** Dhacdooyinka **Tababarka** illaamaa labo ka qeybqaate ama ka badan ay ka qeybqaadaneysa.
- **Wagtiga dhowro oo u diyaargarow:**
 - Waxaan imaanayaa aniga oo diyaarsan si aan u gaarsiiyo tababarka waqtiga bilaabida la qorsheeyay sida lagu tilmaamay sharaxaadaheyga **Dhacdada Tababarka**.
 - Waan salaamayaa ka qeybqaatayaasha oo waxaan leeyahay qorsho taageero haddii ay jiraato howlgabka cilmiga farsamada.
 - Waxaan u labisanayaa si xirfadeysan.
- **Waxaan u xiriirayaa si wax ku ool ah:**
 - Waan ka fikirayaa ka qeybqaatayaasheyda oo aan siinayaa hagida sida la codsaday iyo jaheynta sida loogu baahanyahay.
 - Waxaan u gudbinayaa bixiyayaasha daryeelka carruurta shatiyeysan ee gobolkooda ama shatiyeeyaha gobolka iyo/ama walaacyada ku saabsan jaheynada shatiyeynta ama Qaanuunada iyo sharciyada Minnesota.
 - Ma **isticmaalayo** cay ama luuqad walba ee loo tixgelin karo takoorid, xaqiraad, ama sharaf dhaca ee shaqsiga ama koox walba oo ay ku jiraan wakaaladaha diyaarsan si aan u taageero guulaheyga sida:
 - [Achieve – Xarunta MN ee Horumarinta Xirfadlaha](#)
 - [Parent Aware](#)
 - [Child Care Aware of MN](#)
 - [Tababaraha iyo Adeegyada Taageerada RBPD](#)
 - [Develop Helpdesk](#)
 - [Shaqaalaha iyo barnaamijyada DHS](#)
- **Ilaaliyo sharafta nidaamka Hormarinta Xirfadlaha ee MN iyo ilaali danaha ugu wanaagsan ee ka qeybgalayaasheena:**
 - **Waxaan:**
 - Soo bandhigayaa warbixin ixtiraam leh oo lagu daray dhaqamo kala duwan iyo noocyada bixiyaha.
 - Raacayaa sharciyada xuquuqda koobiga iyo lahaanshaha nuxurka iyo jihada.

- Sare u qaado nafsadeyda iyo/ama **Dhacdooyinka Tababarka** sida lagu ansixiyay iyada oo loo marayo Develop kaliya markii **Xubinnimada Tababaraha** ay ku qorantahay heerka **Hadeer** ee Develop.
- Gaarsiiso dhammaan jadwalkeyga **Dhacdooyinka Tababarka** oo muddada saacadaha Koorsada sida la geliyay oo looga ansixiyay Develop.
- Ku dhiirogeliyo jawaab celin daacad ah ka qeybgalayaasheyda oo sare u qaado oo isticmaalkooda ee **Aalada Qiimeynta Tababarka iyo Tababaraha Develop (TTET)**.
- Waxaan si koronto ah u gelinayaan ka qeybgalkooda ee saxida **Dhacdada Tababarka** ee Develop ee 3 maalmood gudahood ee xigta dhameystirkooda **Dhacdada Tababarka**.
 - Waxaan kaliya oo aan gelinayaa ka qeybgalka loogu talloagalay ka qeybgalayaasha ka qeybgalo **dhammaan saacadaha** ee buundada Qeybta dhacdada Tababarka (tusaale, imaanshaha soo daaha, bixitaanka hore, kulamada maqnaanshaha ee kulanka badan ee **Dhacdooyinka Tababarka**) lama ogola.
- **Kama:**
 - Qeybqaadanayo falalka qiyaanada ama aan iska indhatiro hab dhaqamada aan anshaxa aheyn (ardaydeyda, asxaabteyda, wakaaladaha, ama goobaha tababarka) ee waxyeelada u leh carruurta ama barnaamijyada waxbarashada hore.
 - Ka codsado tabarucaadaha nooc walba, ha ahaato lacag ama alaab isku nooc ah.
 - Dalacayo ka qeybgalayaasha qidmooyin dheeraad ah oo duubitaanka ka qeybgalayaashooda ee Develop.
 - Sare uma qaadayo alaabaha iyo adeegyada ee aan u taaganahay inaan ka faa'ido.
 - Sare uma qaadayo ajendaha siyaasada ee nooc walba.

HEERKA TABABARAHA

Si loo joogteeyo ansixinta **Xubinnimada Tababaraha**, waan fahamsannahay:

- Waxaan u baahannayaa inaan bilaabo nidaamka ansixinta haddii xaalada Xubinnimada Tababaraha La ansixiyay ay dhacsaneyd wax ka badan 90 maalmood.
- Doorkeyga sida tababaraha ee cilmigeysiga dheeraadka ah, taqasusnimada, iyo waxbarashada. Qaababka ee aan u sameeyo nafsadeyda iyo Dhacdooyinkeysiga Tababarka waxay leeyihiin saameyn qoto dheer ee goobta ee waxbarashada carruurnimada hore ee bulshooyinkooda.
- Dhacdooyinka Tababarkeyga waxay quseysaa kormeerid wareegto ah oo ujeedooyinka maareynta tayada.
- Aniga aya masuul ka ah jabin xeerar walba ama sharuudaha lagu tilmaamay heshiiskan iyo/ama ee xaaladaha meesha ka qeybgalaha ama ka qeybgalayaasha ay muujiyaan walaac ku saabsan kartiyadeyda tababarka kadib ka qeybgalka mid ka mid ah Dhacdooyinka Tababarkeyga.
 - Waxaan dib u eegay [Xeerka Walaaca Tayada Tababarka](#) oo waan ogolaaday inaan ka qeybqaato dhexdhexaadinta iyo/ama cadeynta wadahalada goorta iyo haddii walaac uu ku soo wargeliyay ka qeybgalaha Dhacdada Tababarka Achieve – Xarunta MN ee Hormarinta Xirfadlaha iyo TARSS.
 - Waxaan garwaaqsaday in Xaalada Tababaraha Hadeer laga yaabo inuu ku xadeysanyahay Develop ee jaheynta Achieve ee dhacdada Walaaca Tababarka la soo wargeliyay ee u baahan dib u eegid.
 - Waxaan garwaaqsanahay in Xubinnimadeyda Tababaraha si joogto ah looga laaban karo sida ku saleysan natiijada dib u eegida Walaaca Tababarka iyo go'aaminta.
 - Haddii la ii ansixiyo inaan tababaro koorsooyinka ay leeyihiin DHS waan fahamsannahay inay i quseyneyso xeerarka heshiiska ee aan ogolaaday oo waxaa layga saari karaa sida tababare la ansixiyay ee dhammaan koorsooyinka DHS haddii aan jabiyo xeerarka.

Waxaan xaqiijinayaa in codsiga **Xubinnimada Tababaraha** la gudbiyay iyo waraaqaha taageerada ee la siiyay Achieve – Xarunta MN ee Hormarinta Xirfadlaha oo ay si sax ah u muujiso tababarkeyga, waxbarashada, iyo qibrada. Anoo elektiroonig ahaan ku raacaya foomkaan, waxaan xaqiijinayaa inaan u hogaansamo dhammaan xeerarka iyo sharuudaha lagu dajiyay heshiiskan Xubinnimada Tababaraha, oo ay la jiraan faham buuxo ee in ku xadgudubka mid ka mid ah bayaanada ama nidaamyadaan saameyn xun ku yeelan karaan xaaladeyda sida Tababaraha ay ansixiyeen Achieve oo ay ku jiraan ka joojin iyo/ama kala noqoshada xaaladeyda Xubinnimada Tababaraha.



FOOMKA HESHIISKA XUBINNIMADA TABABARAHHA

Magaca Buuxo

Saxiixa

Taariiqda